



CARES ACT

Gargaarka, iska caawinta koronafayras iyo badbaadada dhaqaalaha

Maxaa kugu jiro adiga?

Gargaarka, iska caawinta koronafayras iyo badbaadada dhaqaalaha (CARES) Act waa xirmo gargaar ah oo uu koongareesku meelmariyay si uu ugu jawaabo safmarka COVID-19. Waa wareegii saddexaad ee sharciga dowladda dhexe ee lagu taageerayo dhaqaalaheena siduu u biloowday qalalaasahan.

Sharciga CARES Act wuxuu taageero dhaqaale siinayaa qaybta ganacsiga, shaqaalaha, shaqsiyaadka, iyo qoysaska leh:



- ▶ Cashuur celin deg-deg ah oo dhan ilaa \$ 1,200 lasiinayo canshuur bixiye kasta;
- ▶ Dayn la saamixi karo, dulsaarna lahayn ee looga talagalay ganacsiga yaryar;
- ▶ Dayn toos ah ee loogu talagalay warshadaha saamaynta ugu daran gaartay;
- ▶ Dabcinta sharciga cashuurta dakhliga iyo waqtiga kama dambaysta ah ee canshuur celinta;
- ▶ Gargaarka lacageed oo socon doona kaasoo loogu talagalay ardayda, dugsiyada, iyo kuliyadaha; iyo
- ▶ Xasilin toos ah ee suuqa lacagta ee lawada leeyahay.

Muuujinta loogu talo galay Shaqsiyaadka, qoysaska iyo adeeg bixiyeyaasha.

LACAG BIXINTA SAAMAYNTA DHAQAALAH (sidoo kale loo garanayo jeegaga kobcinta)

Sharciga CARES Act wuxuu bixiyaa canshuur celin deg-deg ah oo dhan \$ 1,200 oo lasiinayo canshuur bixiye kasta, oo lagu daray \$ 500 ilmo kasta. Lacagtan (marka laga reebo lacagta ilmo kasta) waxaa loo laba laabay qoyska canshuurta wada xaraystay. Bixinta ayaa si tartiib tartiib ah loo dhimayaa dakhliga ka sarreeya \$ 75,000 gabi ahaanna ka dhamaanayo shaqsiyaadka marka daqligooda gaaro \$ 99,000 iyo \$ 198,000 lamaanaha.

Lacag bixinta waxaa bixin doona Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS), oo la mid ah canshuur celinta. Haddii qofku canshuur buuxiyay sanadkii 2018 ama sanadkii 2019, lacag bixinta waxay si toos ah loogu tuuri doonaa koontada bangiga ama ciwaanka IRS-ta faylkeeda kujiro.

Dadka qaata SSI ayaa u qalma caawintan. Lacagahan la bixinayo looma xisaabin doona dakhli ama hanti ahaan 12-ka bilood. Tani macnaheedu waa in dadka naafada ah ay aqbali karaan lacagta la bixinayo iyaga oo aan halis gelin Dakhliga Dheeriga ee Bulshada (SSI), daqliga badbaadada bulshada, barnaamijka Kaalmada Nafaqada (SNAP), iyo faaidooyinka kale.

Dadka qaata SSI-da ee aan haysan ilmo u qalmo uma baahna inay ficil qaadaan si ay u helaan lacagta la bixinayo. Dadka qaata SSI-da ee leh caruur u qalma, si kastaba ha noqotee, waxay u baahan doonaan inay isticmaalaan boga looga talagalay dadka aan canshuurta buuxin kaaso laga helo halkan: irs.gov/coronavirus/non-filers-enter-payment-info-here.

WAX BADAN OGOW



Booqo websaydhka IRS-ta ee koronafayras si aad ugu hesho warbixin iyo macluumaadka: irs.gov/coronavirus.

Si aad u hesho faham fudud oo ku saabsan lacag-bixinta saameynta dhaqaalaha iyo faaidooyinka kale, booqo bogga dadaalka Washington ee loogu talagalay taageeridda faaidooyinka shaqaalaha: gowise.org/wabenefitsinfo.



Diyaar, La Diyaariyay, Ogoow

CARES ACT

Gargaarka, iska caawinta koronafayras iyo badbaadada dhaqaalaha

Maxaa kugu jiro adiga?

CAYMISKA LAGU HORUMARINAYO DADKA SHAQA LA'AANTA AH (UI)

Horumarinta faa'iidooyinka dadka shaqo la'aanta ah oo hoos imaanaysa Sharciga CARES Act ayaa 13 toddobaad oo dheeraad ah ku dari doona 26-da toddobaad ee faa'iidooyinka shaqo la'aanta Washington. Sharciga sidoo kale wuxuu bixinayaa toddobaad walbo \$600 oo dheeri ah lacagaha la bixinayo ee gobolka xisaabiyay. Lacagta \$ 600 ee isbuuc walbo dheeriga ku ah Caymiska Shaqa la'aanta (UI) ayaa waxaa oggolaaday sharciga CARES Act oo aan la isticmaali doonin marka la go'aaminayo daqliga ujeedooyinka uqalmitaanta Medicaid.

Faaidooyinka shaqa la'aanta ee la balaariyay waxaa ku jiro faaidooyinka caymiska shaqa la'aanta cudurka safmarka ah (PAU), kaas oo daboolaya kuwa aan inta badan u qalmin, sida kuwa iskood u shaqeysta, qandaraasleyaasha madaxa bannaan, kuwa leh taariikh shaqo oo xaddidan, ama buuxiyay gargaarkooda shaqo la'aanta gobolka. Illaa 39 toddobaad oo PUA ah ayey heli karaan shaqaalaha Gobolka Washington oo isla markaaba xaq u leh inay helaan PUA.

WAX BADAN OGOW



Waaxda Badbaadada Shaqaalaynta: esd.wa.gov/newsroom/covid-19.

Dadaalka Washington ee lagu taagerayo shaqaalaha: gowise.org/wabenefitsinfo.

DAYNTA LOOGU TALAGALAY HAKADKA KU YIMID GANACSIGA YARYAR.

Haddii aad leedahay ganacsi yar oo uu saameeyay faafitaanka COVID-19, sharciga CARES Act wuxuu balaarinayaa u qalmitaanka ee dayn qaatayaasha iyo xaddiga daynta ay helayaan iyaga oo lasoo marinayo maamulka ganacsiga yaryar ee Maraykanka. Amaahdan ayaa sidoo kale ka caawin dootna ganacsatada inay bixiyaan kharashka caafimaadka sii kordhay, qoyska, iyo fasaxa bukaanka oo looga baahan yahay inay siiyaan shaqaalaha.

CARES Act wuxuu balaarinayaa maamulka deymaha ee ganacsiga yaryar-loo garanayo 7(a) deymaha-lasiinayo ganacsi kastoo yar, hay'ad samafal oo gaar loo leeyahay, ama hay'ad samafal oo aan gaar loo lahayn oo leh shaqaalo ka yar 500. Kuwa wax amaahdaa waxay heli karaan amaah ay lamid tahay 2.5 jeer mushaharkooda billaha ah, amaahda, kirada, iyo bixinta bixinta deynta, ilaa \$ 10 milyan. Dadka daynta qaadanaya waxay u isticmaali karaan amaahda kharashka ganacsiga oo kala duwan oo ay ka mid yihiin: mushahar bixinta, fasaxa bukaanka oo la bixiyo, amaahda guryaha, kirada, qarashka biyaha, korontada iyo qashinka, iyo bixinta deynta lagu leeyahay.

Sharciga CARES Act wuxuu kaloo bixinayaa cafiska daynta loo isticmaalay kharashaadka sii socda ee joogtaynta inta lagu gudajiro 2020 ee bixinta mushaharka iyo deynta, oo lagu daray mushaharka dheeriga ah ee lasiiyo shaqaalaha la cayimay.

WAX BADAN OGOW



Maamulka Ganacsiga yaryar ee Mareykanka: sba.gov

Ogsoonow: Waxaa jira waxyaabo badan oo lagu soo daray Xeerka CARES Act, iyo sidoo kale shuruucda federaalka ah iyo shuruucda gobolka kuwaaso ka kaalmaynaya dhaqaalaha saamaynta COVID-19. Kala soco wixii warbixino ah ee soo kordha: coronavirus.wa.gov/news.